



**JUMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
BAARLAMAANKA FEDERAALKA**

QARAAR KU SAABSAN

**WAX KU KORDHIN QODDOBADA XEER
HOOSAADKA KMG QAYBTA DOORASHADA
MADAXWEYNAHA JFS**

Muqdisho, 24^{ka} Janaayo 2017

Kalfadhiga: 1-aad

Kulankiisa: 3-aad ee Wadajirka Labada Gole ee BFS

BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA:

Kalfadhiga 1-aad Kulankiisa 3-aad ee Wadajirka Labada Gole (Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare) ee 24^{kii} Janaayo 2017 ku yeesheen xarunta Golaha Shacabka waxay qodob qodob uga doodeen mooshin ay soojeediyeen 15 xildhibaan oo ku saabsanaa wax ka beddelid iyo wax ku kordhin lagu sameenayo Xeer Hoosaadka KMG Doorashada Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya:

Qodobka 1-aad:

In Tirada Xubnaha Aqalka Sare ee ka mid noqonaya Guddiga Doorashada Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya laga dhigo Lix (6) xubin. Codeynta waxay noqotay sidatan:

Tirada Oggol:	170 Xildhibaan
Tirada Diiday:	52 Xildhibaan
Tirada ka aamustay:	4 Xildhibaan
Tirada guud codeysay:	226 Xildhibaan

Qodobka 2-aad:


Warqadda Dhowrista Anshaxa Guddiga BFS ee Doorashada Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa in ay hubiyaan Musharrax kasta oo u tartamaya xilka Madaxweynaha in uu saxiixo Warqadda Dhowrista Anshax Wanaagga. Codeynta waxay noqotay sidatan:

Tirada Oggol:	224 Xildhibaan
Tirada Diiday:	0
Tirada ka aamustay:	2 Xildhibaan
Tirada guud codeysay:	226 Xildhibaan

Qodobka 3-aad:

In ciidanka sugaya nabadgelyada goobta Doorashada ay ka dhaceeyso ay toos uga amar qaataan Guddoonka Baarlamaanka. Codeynta waxay noqotay sidatan:

Tirada Oggol:	211 Xildhibaan
Tirada Diiday:	12 Xildhibaan
Tirada ka aamustay:	3 Xildhibaan
Tirada guud codeysay:	226 Xildhibaan



Qodobka 4-aad:

Guddiga Ilaalinta Bedqabka Geeddisocodka iyo Anshax Wanaagga in Guddoonka Baarlamaanka Federaalka uu magacaabo Guddiga Ilaalinta Bedqabka Geeddisocodka iyo Anshax Wanaagga Doorashda MJFS.

Codeynta waxay noqotay sidatan:

Tirada Oggol:	213 Xildhibaan
Tirada Diiday:	6 Xildhibaan
Tirada ka aamustay:	7 Xildhibaan
Tirada guud codeysay:	226 Xildhibaan

In Xubnaha Guddigan ay noqdaan muwaadiniin aan ka mid ahayn Xildhibaanada Labada Gole ee BFS.

Codeynta waxay noqotay sidatan:

Tirada Diiday:	35 Xildhibaan
Tirada Oggol:	188 Xildhibaan
Tirada ka aamustay:	3 Xildhibaan
Tirada guud codeysay:	226 Xildhibaan

Qodobka 5-aad:

Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka in ay maamulka Doorashada Madaxweynaha ka noqdaan goobjoogto.

Codeynta waxay noqotay sidatan:


Tirada Oggol:	202 Xildhibaan
Tirada Diiday:	20 Xildhibaan
Tirada ka aamustay:	4 Xildhibaan
Tirada guud codeysay:	226 Xildhibaan

Qodobka 6-aad:

Musharrax kasta oo buuxiya Shuruudaha looga mid noqonayo Musharraxiinta u tartamaya xilka Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waa in hadaljeedintiisa BFS ka hor loo abaabulo dood furan toos loogu tebiyo Warbaahinta Qaranka iyo kuwa kale ee daneynaya.

Codeynta waxay noqotay sidatan:

Tirada Oggol:	199 Xildhibaan
Tirada Diiday:	11 Xildhibaan
Tirada ka aamustay:	16 Xildhibaan
Tirada guud codeysay:	226 Xildhibaan



Qodobka 7-aad:


Xildhibaanada labada Gole (Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare) Baarlamaanka 10-aad ee Soomaaliya waxay wadar-oggol ku ansixiyeen in kharajka diiwaangelinta laga qabto musharrixiinta Madaxweynaha 50% loogu dee qo gurmadka abaaraha ka jira Dalka.

Qodobka 8-aad:

Xildhibaanada Labada Gole (Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare) Baarlamaanka 10-aad ee Soomaaliya waxay wadar-oggol ku ansixiyeen in kharajka diiwaangelinta laga qaabadayo musharrixiinta haweenka ah ee u tartamaya xilka Madaxweynaha laga dhigo 50% oo ah USD \$15,000.00/- (Toban iyo Shan Kun Doolar).

Qodobka 9-aad:

Xoghayaha Guud ee BFS waxaa la amrayaa in qoddobadan wax ka beddelka lagu sameeyey uu qodob walba ku dhafo hadba qodobkii u aaddan Xeer Hoosaadkii kmg ahaa ee loo ansixiyey in looga gudbo muddadii kala guurka Baarlamaanka 9-aad iyo Baarlamaanka 10-aad ee Jumhuuriyadda.


M. ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka Soomaaliya

